



Kasbashada Dibloomaha: Fasalka 2009^{ka} iyo Waxii kasareeya

Dhamaan ardayda oo dhan ayaa ugu baahan aasaas adag oo la xidhiidha akhriska, qorista iyo xeelada xisaab ee dariiqa kasta ee xirfadeed ee ay u sii marayaan waxbarashadooda dugsiga sare kadib. Dhowr ka mid ah shuruudaha qalin jabinta ee dawlad gobaleedka ayaa loogu talo galay in lagu hubiyo in ardaydu ay leeyihiin aasaaskan.

Fasalada qalin jabinta ee 2009-2012, waxaa ardayda ku waajib ah in ay ka gudbaan imitixaanka Qiimeynta Waxbarashada Ardayga ee Washington (Washington Assessment of Student Learning) (WASL) ee dugsiga sare la xidhiidha akhriska iyo qorista, badalka kale ee u ansaxiso dawlad gobaleedka ee lagu badalayo WASL ama qiimeynta loogu talo galay ardayda ku Jirta waxbarashada khaaska ah. Ardaydu waxay ku dabooli karaan shuruudaha maadada xisaabta ee dawlad gobaleedka haddii ay ka gudbaan imitixaanka WASL ee maadada xisaabta ee dugsiga sare, badalka kale ee u ansaxiso dawlad gobaleedku ama qiimeynta loogu talo galay ardayda ku jirta waxbarashada khaaska, **AMA**, sii waditaanka kasbashada dhibcaha maadada xisaabta oo haddii ay ku qaataan sanadka qiimeynta haboon ee maadada xisaabta ilama ay qalin Jabinayaan.

Ardayda Fasalka 2013^{ka} ayaa ugu horeyn doona in lagu shardiyeeyo in ay ka gudbaan cilmiga sayniska iyo xisaabta ee WASLs ee dugsiga sare, badalka kale ee u ansaxiyo dawlad gobaleedku ama qiimeynta loogu talo galay ardayda ku Jirta waxbarashada khaaska. Fasalka 2013ka waxaa uu yeelan doonaa fursad dheeraad ah oo uu ku dooranayo xisaabta dhamaadka-imitixaanada waxbarashada socota. Marka laga bilaabo 2014ka, imitixaanka haatan Jira ee WASL ee xisaabta ee dugsiga sare waxaa lagu badali doona xisaabta dhamaadka-imitixaanada waxbarashada socota, kaasi oo loogu baahnaa doonaa qalin Jobinta. Haddii aad macluumaad dheeraad ah uga baahnaatid arrimaha qalin Jabinta, fadlan booqo: <http://www.k12.wa.us/GraduationRequirements/default.aspx>.

Shuruudaha Qalin Jabinta Dawlad Gobaleedka Washington

(Goaanka laga gaadho marka ardaygu ugu horeynta soo galo fasalka sagaalaad)

Fasalada 2009-2012 (Ardayda fasalada 9-12 ee 2008-09)	Fasalada 2013 (Ardayda fasalka 9 ee 2009-10)	Fasalada 2014 (Ardayda fasalka 9 ee 2010-11)
<p>AKHRISKA IYO QORISTA Ku gudbo akhriska iyo qorista imitixaanka WASL uu dugsiga sare ama qiimeynta ardayda ku Jirta waxbarashada khaaska. --AMA-- Ku gudbo akhriska iyo qorista Fursada gaaritaanka Shahaado Dugsiyeedka Waxbarashada (Certificate of Academic Achievement option) (badalka dawlad gobaleedku ansaxiyo).*</p>	<p>AKHRISKA IYO QORISTA Ku gudbo akhriska iyo qorista imitixaanka WASL uu dugsiga sare ama qiimeynta ardayda ku Jirta waxbarashada khaaska. --AMA-- Ku gudbo akhriska iyo qorista Fursada gaaritaanka Shahaado Dugsiyeedka Waxbarashada (Certificate of Academic Achievement option) (badalka dawlad gobaleedku ansaxiyo).*</p>	<p>AKHRISKA IYO QORISTA Ku gudbo akhriska iyo qorista imitixaanka WASL uu dugsiga sare ama qiimeynta ardayda ku Jirta waxbarashada khaaska. --AMA-- Ku gudbo akhriska iyo qorista Fursada gaaritaanka Shahaado Dugsiyeedka Waxbarashada (Certificate of Academic Achievement option) (badalka dawlad gobaleedku ansaxiyo).*</p>
<p>XISAAB Ku gudbo xisaabta imitixaanka WASL ee dugsiga sare ama qiimeynta ardayda ku Jirta waxoarashada khaaska. --AMA-- Ku gudbo xisaabta Fursada Gaaritaanka Shahaado Dugsiyeedka Waxbarashada (badalka dawlad gobaleedku ansaxiyo).* --OR-- Kasbashada labada dhibco ee xisaabta (ama xirfada iyo waxbarashada farsamada u dhiganta) fasalka 10^{aad} kadibi IYO dib u qaato WASL ama badalka dawlad gobaleedku ansaxiyo ee qiimeynta xisaabta ee sanadka (Ardayda waxaa looga baahan yahay in ay ka gudbaan fasalada xisaabta, maaha qiimeynta, si loo kasbado dibloomaha)</p>	<p>XISAAB Ku gudbo xisaabta imitixaanka WASL ee dugsiga sare, ama dhamaadka-imitixaanka waxbarashada socota ama qiimeynta ardayda ku Jirta waxbarashada khaaska. --AMA-- Ku gudbo xisaabta Fursada Gaaritaanka Shahaado Dugsiyeedka Waxbarashada (badalka dawlad gobaleedku ansaxiyo).*</p>	<p>XISAAB Ku gudbo xisaabta dhamaadka-imitixaanka waxbarashada socota ama qiimeynta ardayda ku Jirta waxbarashada khaaska. --AMA-- Ku gudbo xisaabta Fursada Gaaritaanka Shahaado Dugsiyeedka Waxbarashada (badalka dawlad gobaleedku ansaxiyo).*</p>
<p>SAYNISKA Ku gudbo sayniska imitixaanka WASL ama qiimeynta ardayda khaaska. --AMA-- Ku gudbo Fursada Gaaritaanka Shahaado Dugsiyeedka Waxbarashada (badalka dawlad gobaleedku ansaxiyo).*</p>	<p>SAYNISKA Ku gudbo sayniska imitixaanka WASL ama qiimeynta ardayda khaaska. --AMA-- Ku gudbo Fursada Gaaritaanka Shahaado Dugsiyeedka Waxbarashada (badalka dawlad gobaleedku ansaxiyo).*</p>	<p>SAYNISKA Ku gudbo sayniska imitixaanka WASL ama qiimeynta ardayda khaaska. --AMA-- Ku gudbo Fursada Gaaritaanka Shahaado Dugsiyeedka Waxbarashada (badalka dawlad gobaleedku ansaxiyo).*</p>
<p>SHURUUDAHA KALE Daboolista dhamaan shuruudaha kale ee qalin Jabinta ee dawlad gobaleedka iyo dugsiga degmada: Mashruuca Gaarista Marxalada Ugu Dambaysa, Dugsiga Sare iyo Waxii Dhaafsiisan Qorshaha iyo shuruudaha dhibcaha degaanka.</p>	<p>SHURUUDAHA KALE Daboolista dhamaan shuruudaha kale ee qalin Jabinta ee dawlad gobaleedka iyo dugsiga degmada: Mashruuca Gaarista Marxalada Ugu Dambaysa, Dugsiga Sare iyo Waxii Dhaafsiisan Qorshaha iyo shuruudaha dhibcaha degaanka.</p>	<p>SHURUUDAHA KALE Daboolista dhamaan shuruudaha kale ee qalin Jabinta ee dawlad gobaleedka iyo dugsiga degmada: Mashruuca Gaarista Marxalada Ugu Dambaysa, Dugsiga Sare iyo Waxii Dhaafsiisan Qorshaha iyo shuruudaha dhibcaha degaanka.</p>

* Ardaydu waxaa ku waa Jib ah in ay qaataan imitixaanka WASL ee dugsiga sare hal mar kahor isticmaalida badalka dawlad gobaleedku ansaxiyo haddii aaney ahayn kaliya kuwo cusub oo loo diwaangaliyay fasalada 11^{aad} iyo 12^{aad}.

Updated September 2008

Aqoon dheeraad ah u yeelo shuruudaha qalin jabinta iyo WASL

Shahaadada Dugsiga Caadiga ah (Certificate of Academic Achievement) iyo Shahaadada Waxbarashada Shaqiga ah (Certificate of Individual Achievement)

- Ardayda ka gudubta akhriska iyo qoraalka iyo xisaabta imitixaanka WASL waxay kasbanayaan Shahaadada Dugsiyada Caadiga ah, (CAA) ama Shahaadaha Waxbarashada Shaqiga, (CIA). Ardayda qaadata shahaadada waxaa loogu xusi doonaa waraaqda lifaaqa dhibcaha.
- Shahaadada Dugsiga Caadiga - Maaha mid loogu talo galay oo ah shuruud loogu talo galay ilama 2013, laakiinse ardaydu waxay wali ku kasban karaan ka gudubtaanka akhriska, qoraalka iyo xisaabta imitixaanka WASLs ama Shahaadada Dugsiga Sare (badalka dawlad gobaleedku ansaxiyay) dhinaca akhriska, qoraalka iyo xisaabta.
- Shahaadada Waxbarashada Shaqiga – Waxaa loogu talo galay ardayda ku Jirta waxbarashada khaaska ah. Maaha mid loogu talo galay in shuruud ahaanta loogu talo galo qalin Jabinta ilama 2013, laakiinse ardaydu waxay wali ku kasban karaan ka gudubtaanka imitixaanka WASL-Basic, WAAS-Portfolio, WAAS-DAW (Developmentally Appropriate WASL) ama Qiimeynta Lagu Goa'amiyay Degaanka oo la xidhiidha akhriska, qoraalka iyo xisaabta.
- Ardayda fasalada 2009-2012 ee ku hela dhibcaha dersiga xisaabta ilama qalin Jabinta, laakiinse aan ka gudbin imitixaanka xisaabta WASL ama mid kale oo la ansaxiyay oo ah qiimeynta maadada xisaabta, ayaa xaq u leh wali in ay helaan dibloomaha laakiinse ma heli doonaan shahaadada.
- Nidaamka ayaa Jira oo loogu talo galay ardayda ee loo soo badalo fasalada 11^{aad} ama 12^{aad} ee dugsiyada dadweynaha ee dawlad gobaleed kale ama dal kale. Ardayda leh xirfadaha laakiinse aan awoodi kari waayay in ay ku muu jiyaan imitixaanka WASL ama badal kale oo dawlad gobaleedku uu ansaxiyay waxay awoodi karaan in ay soo gudbistaan faayil, marxalad rafacaan oo aan la Joo Jin kareynin. Ardayda ku guuleysta rafacaankooda waxay kasban doonaan dillloomaha laakiinse ma helayaan shahaadada.

Imitixaanka WASL ee dugsiga sare

- Ardaydu waxay haaystaan shan fursadood oo dhaqaale oo dawlad gobaleedku ansaxiyay oo loogu ogolaanayo in ay ugu qaataan dugsiga sare imitixaanka WASL arrimaha akhrista, qorista iyo xisaabta. Sayniska laguma maareeyo bisha Ogoosto. Kaasii waxaa uu isbadali doona marka uu ku noqdo shuruuda qalin Jabinta Sandka 2013^{ka}.
- Ardayda ku gudubta Heerka 3^{aad} ama dhibcaha 4^{aad}.
- Imitixaanka WASL waxaa uu dhaca bilaha Maarso/Aabiril iyo Ogoosto ee sanad kasteba.
- Geedi socodka rafacaanka dhibcaha: Waalidiinta/Ilaaliyayaasha, kadib markey dib u baadhaan imitixaanada ardaydooda, waxaa surtagali karta in ay kusoo xareyaan rafacaanka dhibcaha dawlad gobaleedka.
- Si aad wax dheeraad ah uga ogaatid WASL, fadlan booqo: <http://www.wasinfo.com>.

Badalka kale ee WASL ee dawlad gobaleedku ansaxiyay

- Ardayda haaysata xirfada balse aaney u surtoobeynin in xirfadooda ku muu Jiyaan imitixaanka WASL waxaa surtagal u noqon karta in ay isticmaalaan Fursada Shahaadada Waxbarashada Caadiga, ama fursadaha badalka kale ee dawlad gobaleedku ansaxiyay.
- Ardaydu waxay fursada ku gaadhi karaan kadib marka hal mar ay qaataan imitixaanka WASL. Ardayda loogasoo badalo dugsiga dadweynaha ee ka yimaada dawlad gobaleedka ama dal kale ee dhiganayay fasalada 11^{aad} iyo 12^{aad}, iyo ardayda ee loogasoo badal dugsiga dadweynaha ee isla dawlad degaaneedka ee ka dhiganayay galaaska 12^{aad} ama barashada guriga kusaleysan (xaalado khaas ah awgeed) waxae surtagali karta in uu helaan ogalaanshaha deg ah Fursadaha CAA upga oo aan qaadaneynin imitixaanka WASL ee dugsiga sare.
- Fursadaha Shahaadada Waxbarashada Caadiga Waxay ka kooban yihiin:
 - Soo ururinta caddeymaha – Ardayda waxay iskusoo ururinayaan wax isku dhaf ah oo ah muunadaha shaqada fusalka gudimisa isaga oo uu caawinayo ma calinku (macalimiintu). Ururiska ardayda ku Jirta Xirfada Khaaska iyo BarnaamiiJyada Waxbarashada Farsamada waxay ku darsan karaan shaqooyinka ka midka ah barnaamiiJkooda. Dawlad go baleedku waxay dhibcaha siisa ururiska laba Jeer sanadka.
 - Kharashka ayaa Jira oo loogu talo galay ardayda u qalanta in ay qaataan qiimeynta SAT, ACT iyo AP ee la ansaxiyay.
 - SAT ama ACT – Ardaydu waxay ugu is ticmaali karaan dhibcahhooda xisaabta, akhrika, ama Ingiriisiga iyo dhibcahhooda qoraalka imitixaankooda usii diyaargaroobida kuliyada. Dhibcaha ugu yar: **Akhriska** – SAT: 350 ACT: 13. **Qorista** – SAT: 380 ACT: 15. **Xisaabta** – SAT: 470 ACT: 19.
 - Meeleynta Horumarsan (Advanced Placement (AP)) – Ardaydu waxay laga yaaba in ay ugu isticmaali aaraan dhibcahhooda Saddexda ama kasareya imitixaanka xulista ee AP: **Xisaabta** (darsiyada calculus uma statistics), **Qorista** (Luuqada Ingiriisiga qo dhacdo Qorista) iyo **Akhriska** (Sugaanta Ingiriisiga iyo dhacdo qorista, cilmiga dhaqaalaha, cilmi nafsiga, taariikhada Mareykanka, taariikhada dumda, dawlada iyo safaasade marlykanka ama damlad a dhiganta iyo Siyaasaaeeae)
- WASL/Isbarbar dhiga dhibcah – Ardayda fasalka 12aad kaliya. Dhibcaha xisaabta ee ardayga iyo/ama koorasyada ingiriisiga waxaa lala barbardhigaya dhibcaha ardayda qaadatay koorasyada la midka ah IYO ka gudbay imitixaanka WASL ee dugsiga sare. Si ardaygu uu u helo fursadan, waa in uu haaysto guud ahaan isugeynta Isku cel celiska Dhibcaha Fasalka (Grade Point Average) (GPA) markey ugu yar tahay 3.2ka mid ah 4.0 darajada dhibcaha.
- Si aad wax dheeraad ah uga ogaatid badalada kale ee dawlaa gobaleedku ansaxiyay, fadlan boqo: <http://www.k12.wa.us/assessment/CAAOPTIONS/default.aspx>.

Qiimeynta ardayda ku Jirta waxbarashada khaaska ah

- Ardayda ku Jirta waxbarashada khaaska waxay qaadan karaan imitixaanka WASL ee dugsiga sare iyada oo ay la Jirto ama aaney la Jirin adeegyada ama isticmaatida, mid ka mid ah Fursadaha Shahaadada Waxbarashada Caadiga.
- Waxaa kale oo Jira fursadahan kale:
 - WASL-Basic – Ardaydu waxay qaadanayaan imitixaanka WASL ee dugsiga sare - iyada oo ay Jiraan adeegyo ama aaney Jirinba - laakiinse kooxda IEP ayaa is ku habeeya shuruudaha ka gudubtaanka marka laga bilaabo heerka khibrada (Heerka 3) ilaa Aasaaska (Heerka 2).
 - Boortofoliyada Nidaamka Qiimeynta Badalka Washington (Washington Alternate Assessment System Portfolio) (WAAS Portfolio) – Ardayda aaney u surtoobeynin imitixaanada warqada iyo qalin beensilka waxay ku muujinayaan xirfadahooda iyo aqoontooda ururiska shaqooyinkooda.
 - Ku haboon Horumarka WASL (Developmentally Appropriate WASL) (WAAS-DAW) – Ardayda ku Jirta Galaasyada 11 iyo 12 kali ayaa qaadanaya imitixaanka WASL - iyada oo ay Jirto adeegyadu ama aaney Jirinba - heer fasal ahaan oo sida ugu wanaagsan waafaqaya partiidoodo. Ardayda ku gudubta imitixaanka DAW iyaga oo kasbanaya khibrada (Heerka 3) imitixaanka kasta ee la qaatay.
 - Qiimeynta Lagu Goaamiyo Degaanka – Ardayda galaaska 12^{aad} ee u baahan heerarka natiijada casriyeesan.
 - Heerka Ogaanshaha – Waxaa loogu talo galay ardayda ogaaday in wax qabadkoodu yahay heerka "ogaanshaha".
- Si aad xogogaal dheeraad ah uga heshid qiimeynta waxbarashada khaaska, fadlan boqo: <http://www.k12.wa.us/assessment/altassess.aspx>.